# FARRIIMAHA MUHIIMKA AH

Kulanka Dhaqaalaha Soomaliland ee lagu eegayo Kobaca & Shaqo la'aanta, Saboolnimada iyo Sicir bararka iyo Siyaasadda Miisaaniyada
Hargeisa, 29 Jeeniwari 2014

## 1. QEEXID

| Eray bixin / Erayo la soo gagaabiyey | Macnaha |
|---|---|
| Hagaha Qiimaha iibsadaha (CPI) | Waa qiyaasta celceliska isbadalka muddo kadib ku dhaca qiimaha suuqa lagula socdo badeecadaha iyo adeegyada iibsadaha |
| Hannaanka uu Dakhligu ugu qaybsan yahay Qaranka<br>Gini Coefficient | Waa qiyaasta sinnaan la'aanta. Markasta oo boqolkiiba tiradu inta ay noqonaysaa ay badato, markasta waxa sii badanaya sinnaan la'aanta saami qaybsiga |
| Tacabka wax soosaarka guud ee Waddan (GDP) | Qiimaha dhammaan badeecadaha iyo adeeggyada waddanka gudihiisa lagu soo saaro sannad gudihii. |
| Waxsoosaarka guud ee waddan ee ku soo hagaagi karta marka Loo qaybiyo qofka Boqolkiiba | Waxsoosaarka guud ee waddan oo loo qaybiyey tirada guud ee dadka ee ku salaysan dhaqaalaha |
| Qaabeynta Tacabka Hantida sugan<br>Gross Fixed Capital Formation | Waa tilmaame muujinaya inta qiimaha cusub ee dhaqaale la maalgaliyey ee aan eegayn inta la isticmaalay. |
| Sabool/faqri<br>Poor | Waa qof ku nool wax ka yar 184,000 SL.Shilling bishiiba kuna nool magaalooyinka ama 163,000 SL.Shilling ah bishiiba baadiyaha. |

## 2. NATIIJOOYINKII KA SOO BAXAY KULANKA

*Kobaca iyo Shaqo la'aanta*

- Sannadkii 2012, Wax soosaarka Guud ee waddanka Soomaaliland waxaa lagu qiyaasay **$1.4 bilyan** (oo ah qiimaha hadda Doollarka Maraykanka)[1].
- Sannadkii 2012, Wax soosaarka Guud ee waddanka Soomaaliland qofkiiba ku soo hagaagaya waxaa lagu qiyaasay **$347** oo ah qiimaha hadda Doollarka Maraykanka).
- Wax soosaarka Guud ee wadanka Soomaaliland ee qofkiiba ku soo hagaagaya qiyaas ahaan wuxuu kaga jiraa adduuunka kaalinta 4[aad] halka ugu hooseeysa, waxaana uu ka horeeyaa Malaawi, Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Koongo (DRC) iyo Burundi.
- Qaybaha ugu waaweeyn ee ay ka kooban tahay Waxsoosaarka Guud ee wadanka Soomaaliland waxaa ka mid ah: 30% Ganacsiga Xoolaha nool; 20% ganacsiga Jumaladda iyo Tafaariiqda (oo ay ka mid yihiin qaybo badan oo aan rasmi ahayn[2]); 8% midhaha iyo 6% hantida
- Dhaqaalaha Somaliland aad ayuu u furfuran yahay (tusaale ahaan. Waxay ka ganacsadaan waxyaalo badan):
    - Saamiga soo dajinta iyo dhoofinta adduunka waxay kaga jirtaa kaalinta 45[aad] halka ugu saraysa
    - Dhakliga cashuurta Ganacsiga kala badh in ka badan waxay ka soo xaroodaan dakhliga waddanka guddihiisa
- Sannadkii 2012, hoosu dhaca ganacsiga Somaliland ku yimid waxaa lagu qiyaasay $496 milyan, kaas oo ay kabeen xawaaladaha iyo taageero maaliyadeed oo dibadda laga helay.
- Somaliland waxay leedahay heerar maalgashi oo aad u hooseeya, oo ay kaga jirto kaalinta 180[aad] marka loo eeggo Gross Fixed Capital Formation.
- Waxaa jira shaqo la'aan aad u saraysa, marka shaqada la barbar dhigo saamiga tirada dadku aad ayey uga hooseeysaa isku celcelis ahaan waddamada Afrikaanka ah ee ka Hooseeya Saxaraha [3].

*Saboolnimada iyo[4] Sicir bbararka*

- Qiyaasta hordhaca ahi waxa ay sheegaysaa in sabooltinimada ka jirta magaalooyinka Soomaliland ay tahay 29%, taas oo la mid ah ta ka jirta magaalooyinka Ethiopia (26%) halka sabooltinimada ka jirta miyiga Soomaliland ay tahay 38%, taas oo aad ugu saraysa ta ka jirta waddanka Ethiopia (30%).
- Inkastoo qoysaska deggan magaalooyinku ay ka dhaqaale fiican yihiin qoysaska deggan miyiga, sinaan la'aantu way ka siman tahay miyiga iyo magaalooyinka Somaliland. Dakhliga Somaliland waxa uu u qaybsan yahay 43% magaalooyinka iyo 46% miyiga ah.
- Sinnaan la'aanta dakhligu aad ayey u saraysaa, waxay aad ugu saraysaa Ethiopia waxaana heerar isku mid ah lagu ogaaday waqtii laga sameeyey daraasadii ugu danbaysay Keenya sannadkii 2005.

[1] WGD wuxuu ku salaysan yahay qiyaastii tirada dadka 4 milyan, haddii tirada dadku lagu qiyaaso 3.5 milyan ayaa loo isticmaalay isugaynta WGD marka loo eeggo boqolkiiba tiradu qiyaas ahaan waxay noqonaysaa 5% wax ka hooseeya.
[2] Qaybta dhaqaalaha ee aan cashuurnayn ama aanay la socon Dawladu.
[3] Hayada Shaqaalaha Caalamiga ah Cilmi baadhistii ay ku samaysay Shaqaalaha , 2012.
[4] Natiijooyinkii ka soo baxay ee salka ku hayey Daraasadii Qoyska Soomaaliland ay samaysay sannadkii 2013 – muunad ka mid ah oo ka turjumaysa daraasada qoyska Somaliland.

- Qiyaasaha kale ee aan ahayn dakhliga ee la xidhiidha dadka ladan dhaqaale ahaan Somaliland ayaa iyana la mida marka la barbar dhigo wadamada ay jaarka yihiin ee ku jira qaar ka mida timaamayaasha, laakiin caqabadaha soo wajahayaa ay yihiin bixinta adeeg macquul ah kaas oo sababaya in ay ku guul daraystaan dhawr qiyaasood. Haddii aan waqti hore wax laga qaban Somaliland waxay ku danbayn doontaa dib u dhac sannadada soo socda.
- Heerka wax akhriska iyo qorista ka jirta Somaliland aad ayey uga saraysaa ta ka jirta Ethiopia, qiyaasta is qorista dugsiyada hoose iyo dugsiyada sare aad ayey uga hooseeyaan taas oo muujinaysa in heerka wax akhriska iyo qorista ka jirta Somaliland ay waxoogaa aad ugu sii dari doonto sannadada soo socda marka la barbardhigo ta Itoobiya.
- Isku dheelitirnaanta is qorista dugsiyada ee u dhexeeya wiilasha iyo gabdhaha iyo ta ka jirta miyga iyo magaalooyinku waxa ay muujinaysaa in farqiga jinsiga la xidhiidha ee heerka aqoonta iyo farqiga ka jira magaalooyinka iyo miyigu ay sidaa ahaan doonto haddii aan wax laga qaban. .
- Helitaanka adeegyada caafimaadka ka jira magaalooyinka marka la barbar dhigo magaalooyinka kale ee ka jira gobolka aad ayey u wanaagsan yihiin, laakiin magaalooyinka kuwa degan (a) carruuta badan koodu waxay ku dhashaan guriga iyadoo haba yaraatee aanay gacan siinin umuliso ama qof caafimaadka khibrad u leh, halka (b) ay ka jiran qiyaas carruurta ku dhalata jiidaha miyiga oo aad u saraysa.
- Badi cunooyinka ay qoysku isticmaalaan waa la soo iibsadaa, xataa jiidaha miyiga, tani waxa ay sababtaa sicir barar kaas oo caqabad ku noqda kobacii qoysaska.
- Qiimaha alaabta muhiimka ah ayaa aad isku bedelay shantii sanadood ee u dambaysay, gaar ahaan sare u kacay sanadkii 2008 ka iyo sanadka 2012.
- Xog ururintii sahanka qoyska ee la seemay, waxay fududaynaysaa in la helo ama la ogaado sixir Baraka ku yimaada alaabta.

~~Qiyaasta sicir bararka aan tirade ku salaysnan (isku celcelistka qiime fudud) waxa uu muujinayaa in sicir bararku uu ku dhaw yahay x% Somaliland sannadihii ugu danbeeyey. Macluumaadkii Koowaad ee qiimaha ee ku salaysan tiradu waxa uu muujinayaa inuu sicir bararku qiyaas ahaan gaadhay x%.~~

Formatted: Indent: Left: 0.25", No bullets or numbering

*Siyaasada Miisaaniyada*

- Somaliland waxay u soo martay dawladnimadeeda hannaan muhiima oo ah dhisidda dawladda, kana mid tahay abaabul kasaar, horumarinta hay'adaha, asaasida ciidamada amniga, daabacaadda lacag cusub iyo billawga adeeggyo aasaasi ah.
    - Heerar aad u hooseeya oo taariikhi ah oo la xidhiidha dakhliga waddanka guduhiisa ka soo baxa waxa uu saamaxay oo kaliya sii joogteeynta hawlaha udub dhexaadka u ah dawladda iyo illaalinta nabadda iyo xasilloonida.
    - Qaybta sugidda nabadgelyada ayaa hesha kala badh karashaadka la geliyo dhamaan qaybaha kale ee dawladda.
- Dakhliga waddanka gudihiisa ka soo baxa oo ka ahaa boqolkiiba wax soo saarka guud ee waddanka Somaliland (7.2% sannadkii 2012) ayaa aad uga hooseeyey marka la barbardhigo wadamada kale ee uu dakhligoodu aad u hooseeyo, (isku celceliska Wadamada Afrika ee Ka hooseeya Saxaraha qiyaas ahaan waxay gaadhayaan 23%).
- Maqnaanshaha maalgashiga adeegyada bulsho, ayaa galaafatay horumarka tiro badan oo dad ah.

- Aad ayay u sarraysaa khatarta ay hooyooyinku ku dhintaa marka ay umulayaan, sidoo kale carruurtu khatar aad ah ayay ugu jiraan in ay dhintaan ka hor dhalashadooda 1[aad] , marka Somaliland la barbar dhigo wadamada ay jaarka yihiin sida Ethiopia ama Djibouti.
- Kaliya qiyaas ahaan 50% ka mida carruurta da'adoodu u dhaxayso 6 ilaa 13 jir ayaa aada ma taga dugsiyada hoose Somaliland, oo ay aad ugua hooseeyaan marka la bar bar dhigo 87% carruruta tagta dugsiyada hoose waddanka ay jaarka ee Ethiopia[5].

- Dawlada ayaa muddo dhawayd qaaday talaabo la xusi karo~~,~~ oo ay ku xoojinayaan miisaaniyadda iyo qorshaynta, iyadoo la sii xoojinayo dakhliga, maal~~-~~gashi dheeraad ah la samaynayo iyo iyadoo la isku duwayey khayraadka wadanka dibadiisa laga helo.
- Sannadkii 2012,waxaa la asaasay Guddiga Dajinta Siyaaasada Miisaaniyada (BPC) oo wax ka badashay haanaanka diyaarinta miisaaniyada ee sannadkii 2013, Guddiga Qoshaynta Qaranka ayaa sidoo kale sameeyey hannaan uu ahmiyada ku siinayo Qorshaha Horumarinta Qaranka 2012 ilaa 2016.
- Sannadihii ugu danbeeyey waxaa jiray horumar dheeraad ah oo laga sameeyey dakhliga ka soo baxa wadanka gudihiisa, isagoo u saamaxay in Guddiga Dajinta Miisaaniyada ay kor ugu kacdo 10 ilaa 13% kobaca miisaaniyada loogu talo galay hawlaha maalgashiga.
- Abuurista ama aasaaska la sameeyey Sanduuqa Horumarinta Somaliland (SDF) ayaa u suurto galiyeyin Dawladu ay xakamayso khayraadka dibadda ka imanaya.
- Wax kabadalidda shirkaddaha gaarka loo leeyahay sida – isgaadhsiinta, xawaaladaha iyo nidaamka bangiyada – ayaa loo baahan yahaysi loo sii joogteeyo dakhliga ama loo abuuro tartan dhaqaale ooo dheeraad ah.
- Maqnaashiyaha nidaamka maaliyadeed ee caadiga ah ayaa gebi ahaan caqabad ku ah in la helo maaliyad kaas oo carqalada kowaad ku ah hawlaha ay ka wadaan Somaliland qaybaha shirkadadaha gaarka loo leeyahay[6].
- Horumarinta adeeg bixinta dawliga ah ayaa lagama maarmaan u ah in dib loo eego siyaasadaha maamul dejineed, dib wax uga badalida ururada rayidka ah iyo fulinta Maareeynta Maaliyada Dawlada (PFM) Xeelad ama khidad Dib waxa lagaga badalayo 2013 ilaa 2017.
- Nidaam go'~~;~~aan qaadasho oo la saadaalin karo ayaa loo baahan yahay, iyadoo wasaaradaha cusub, waaxyaha, wakaaladaha iyo guddiyada ay yihiin kuwa kaliya ee la abuuray ka dib markii la sameeyey nidaamyo wadatashi laga fiirsaday oo la xidhiidha maalgalinta iyo maamulistooda.
- Saamaynta ay ku leedahay qaybaha ganacsiga~~rayidka~~ ee gaarka loo leeyahay waxaa waajiba inaanay iska hor istaagin dawlada inay ururiso ~~ay xakamayso~~ dakhliyada~~ ama aanay u~~ u~~isticmaalin~~ una ~~qaniimaadka si ay u~~ maalgaliso dadka.

[5] Tilmaamayaasha Horumarka Adduunka 2013
[6] Sida lagu cadeeyey Daraasada Ganacsiga Somaliland 2013

3. TALOOYIN GUUD OO DHINACYO BADAN TAABANAYA

| | |
|---|---|
| Kor u qaadida Kobac Dhammaystiran | |
| 1. | Si loo fuliyo dib u eegista ku saabsan u tartarmista qaybaha muhiimk ah ee dhaqaalaha si loo oggaado fursadaha iyo caqbadaha loona baalaadhiyo qaybaha muhiimka ah ee dhaqaalaha. Waxaa muhiim in dib loo eeggo sidii **loo asaasi lahaa barnaamijka wax kabadalka dhaqaalaha** kaa oo waafaqsan barnaamijka Qorshaynta Horumarka Qaranka 2012 ilaa 2016 iyo Qabanqaabada Qaab dhismeeka Gaarka ah ee Somaliland (SSA). |
| 2. | Si loo fuliyo cilmi baadhis dheeraada oo ku saabsan astaamaha ama xaaladaha qoysaska saboolka ah iyo u sinaansho la'aanta hantida, helitaanka adeeggyada iyo suuqyada. Si loo wargaliyo siyaasadaha iyo barnaamijka wax ka badalka dhaqaalah ee ay tahahay **inay ku salaysnaadaan awaamiirta kobac dhammaystiran** si loo yareeyo isku dheelitir la'aanta. |
| 3. | In la dardar galiyo sharcigii Baananka daynta si **loo aasaaso nidaamkii Bangigayada caalamiga**, iyadoo ay barbar socdaan nidaamka maaliyadeed ee Islaamiga ah ee jira. Lana xoojiyo awooda Bangiga dhexe si uu helo qaab dhismeed dawli ah oo shaqaynaya. |
| Maalgalinta Adeeggyada Bulshada | |
| 4. | **In la kordhiyo miisaaniyada loogu talogalay adeegga bulshada** sannadka 2015 (iyo miisaaniyada sannadaha soo socda). Korodhka dakhli uruurinta ee sannadadii ugu danbeeyey waa inay aad ugu filnaadaan in meel loo helo si loo bilaabo kordhinta kharashgaraynta adeeggyada bulshada, iyadoo xoogga la saarayo maalgalin halkii xoogga laga saari lahaa kharashaadka soo noqnoqda. |
| 5. | **Dib u eegista kharashgaraynta miisaaniyada heerka qaybanaha** si loo helo aarin dhici karta oommuhiim aa oo ku saabsan taabogalainta qaniimaadka. |
| Horumarinta Dhaqaalaha | |
| 6. | Dawladu, iyadoo kaashanaysa qaybaha Ganacsiga gaarka loo leeyahay, waa inay **Hirgaliso tablaabooyin cusub oo fududaynaya ururinta cashuuraha iyadoo xoogga la saarayo Shirkadaha Waawayn**, si saamiga cashuurta ee Waxsoosaarka Wadanku (GDP ratio) uu u noqdo mid waafaqsan ama la mida heerka wadamada jaarka. |
| 7. | Hawlgalinta iyo awood siinta Gudida dib u eegista iyo ka midhadhalinta cashuuraha isgaadhsiinta iyo xawaaladaha. **Waana in sharciga si adag loo mariyaa shirkadii u hogaansamiwayda shuruucda dalku leeyahay. Waana in la xoojiyo tayada qalabka iyo shaqaalaha** Wasaarada boosta iyo Isgaadhsiinta si qiimayn ay ugu soo samayn karaan wax soo saarka shirkadaha isgaadhsiinta. |

| | |
|---|---|
| 8. | **Waan in ay Deeq-bixiyayaasha** ku taageeraan dawlada Somaliland Mashuuraca u gaarka ah Soomaliland (Somaliland Special Arrangement-SSA) iyadoo nidaamka loo maamuliyaana uu noqon doono sida loo maamulo loo Sanduuqa Horumarinta Soomaliland (SDF) |
| Xoojinta Adeeg –Bixinta | |
| 9. | Maalgalinta iyo Hirgalinta Nidaamka **Dibuhabynta Maamulka Maaliyada Somaliland Sandaha 2013 ilaa 2017 (PFM Reform Strategy)**. Hirgelinlaanta nidaamkani waxay keeni kartaa Qaqabado adeeg siinta Somalialand bulshada caalamka. |
| 10. | Waxa jira sharciga Maamul daadajinta ee dawladaha hoose ( law 23/2002) ooh ore loogu sameeyay wax ka badal iyo sharciga midaynta cashuuraha dawladaha hoose (law 12/2000). Hadaba waxa loo baahan yahay in dib u eegis lagu sameeyo sharciga midaynta dawladaha hoose. Isla markaana la xooyiyo lana tayeeyo is nidaamka ururinta cashuuraha Somaliland. |
| 11. | Waa in dib u habayn waxkhti dhaw ah lagu sameeyo nidaamka shaqaalaha dawlada. |
| Hagaajinta Qorshaynta Miisaaniyad | |
| 12. | **Waa in la sameeyo isku xidh xooggan oo u dhaxeeya qorshaynta iyo miisaaniyada (Planning and Budgeting)**, Sidoo kale waa inuu jiraa xidhiidh dhaw oo ka dhaxeeya Guddiga Qorshaynta Qaranka iyo Guddiga Siyaasada Miisaaniyada. |
| 13. | **Waa inaan la samayn Wasaarado iyo Hayado aan loo bahnayn oo shaqadoodii iyo waajibaadkoodii ay hayaan Wasaarado iyo Hayado jira. Waana in dib u eegis lagu sameeyo awoodaha shaqo ee ay kala leeyihiin Wasaaradaha iyo Hayadaha hada jira.** |
| 14. | Waa in la dhiso qayb hagta Qiimaha Wax kala iibsiga badeecadaha si loo helo **macluumaad ku saabsan sicir bararka si loo helo siyaasad lagu wajaho**. |
| 15. | **In la horumariyo nidaamka ururinta xogta** si loo kormeero wax soo saarka dadka, iyadoo la hubinayo si loo isticmaalo qaab dhismeedyada jira (sida qaabdhismeed ka muunada Tirada Dadka Somaliland 2013), waana in kor loo qaado lana horumariyo habka tira koobka Somaliland. |
| 16. | In la sameeyo **cilmi-baadhis ama daraasad dheeraad ah** si loo kormeero ama loola socdo qaar ka mida tilaamayaasha ugu waaweeyn ee sabooltinimada, iyo (b) in la uruuriyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barakacayaasha (IDPs), xoolo dhaqatada iyo beeralayda. |